



CPS

Dacwad-ku qaadid

Go'aanka in dacwad la qaado

Warqadan daabacan waxay sharax ka bixinaysaa sida go'aamada dacwad-ku qaadidaha loo gaadho

Dacwad-ku qaadid

Go'aanka in dacwad la qaado

Warqadan daabacan waxay sharax ka bixinaysaa sida go'aamada
dacwad-ku qaadidaha loo gaadho

Warqadan daabacan waxay sharax ka bixinaysaa sida **go'aamada dacwad-ku qaadidaha** loo gaadho

Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamaddeed (Crown Prosecution Service CPS)) waa adeega guud ee dacwad-qaadidda dadweynaha ee Ingiriiska iyo Weelishka. Bishii Jannaayo 2010, waxay isku biireen Xafiiska Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada (Revenue and Customs Prosecutions Office, RCPO). Adeegga waxaa madax u ah Agaasimaha Dacwad-qaadidda Dadweynaha (Director of Public Prosecution, DPP) kaas oo sidoo kale ah Agaasime Xafiiska Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada. DPP wuxuu hawlgalladiisa u sameeyaa si madaxbanaan, oo u hogaansan kor-kala socodka Qareenka guud, kaas oo ay hawlaha adeegga dacwad-qaadidda kala xisaabtamaan Baarlamaanku.

Tusmo

Warbixin Taariikheed	3
Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed	4
Go'aanka in Dacwal La Qaado iyo In Kale	5
Dhibanayaasha falka dembi	8
Baadhitaanka Bar-cabiraad	8
Kala Doorasho Xukunnada	9
Xal-gaadhid Maxkamadda ka Baxsan	9
dhalinyarada	10
Aqbalidda Qirasho Dembiilenimo	11
Dib-uga fiirsiga Go'aanka Dacwad-qaadidda	11
Khadka Gargaarka Dulmanaha	12
Cabashooyinka	13
Meelo lala xidhiidho oo waxtar leh	13

Warbixin Taariikheed

Ka hor intii aan CPS la aasaasin sanadkii 1986, booliiska yaa go'aan ka gaadhi jirey in kiisaska maxkamad la hor geeyo iyo in kale.

Maanta, CPS ayaa go'aamisa in dadka dacwad maxkamadda lagu saaro iyo in kale. Hase yeeshee, booliiska ayaa weli baadhitaan ku sameeya falka dembi ee dacwaddu ka taagan tahay.

Kiisaska khatarta ah ama dhinacyada badan, dacwad-qaadayaasha ayaa go'aamiya in qof lagu qaado xukun fal dembi iyo in kale, iyo haddii ay sidaa tahay, waxa uu falka dembi noqonayo. Kiisaska uu booliisku go'aamiyo xukunka waxay isticmaalam mabaadii kuwaas la mid ah.

Waxaanu go'aan ku gaadhnaa in dacwad la qaado iyo in kale anagoo isticmaalayna Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed iyo wixii qaanuuno ah ee la xidhiidha xaqiiqooyinka kiis gaar ah.

Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed

Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed (the Code) waa dukumeenti dadweyne oo dhigaya mabaadiida aasaasiga ah ee dacwad-qaadayaashu ay tahay inay raacaan marka ay go'aano ka gaadhayaan kiisas. Hanaanku wuxuu dhinac socdaa Heerarka Tayo ee Xuddunta ah (Core Quality Standards booklet)The Code sits alongside the Core Quality Standards booklet, labadaasi dukumeenti marka laysku daro, waxay dadweynaha ogaysiinayaan waxa ay dacwad-qaadayaashu sameeyaan; sida ay u gaadhaan go'aannadooda; iyo heerka adeeg ee adeegga dacwad-qaadidda u heelan yahay inuu siiyo mid kasa oo ka mid ah dhinacyada muhiimka ah ee shaqadiisa. Waxaad labada dukumeentiba ka heli kartaa xafiiska CPS ee agagaarkaaga ama bogga internet-ka ee CPS www.cps.gov.uk.

In kasta oo kiis waliba yahay mid khaas ah oo ay tahay in kiis walba iskii looga fiirsado, iyadoo loo eegayo xaqiiqooyinkiisa iyo wax-ku-oolnimadiisa, haddana waxaa jira sharciyo guud oo khuseeya dariiqa ay tahay in dacwad-qaadayaashu u wajahaan kiis walba. Waa inay kuwo cadaali ah oo madaxbaan ahaadaan, kuna salaysan xaqiiqada kiiska. Waa in aanay ogolaan in wax ra'yi shakhsiyeed ah oo la xidhiidha asliyadda ama meesha uu qof ka soo jeedo, jinsiga, kala dhantaalnaa, cimriga diinta ama caqiidada, ra'yiga siyaasaddeed, dookha galmo, ama aqoonsiga jinsiyeed ee eedaysanaha, dhibanaha ama wax markhaati ah ay saamayn ku yeelato.

Waa waajibaadkooda inay hubiyaan in qofka saxda ah dacwadda loogu qaado falka dembi ee saxda ah. Marka ay sidaa samaynayaan, dacwad-qaadayaashu waa inay had iyo goor u hawlgalaan danaha cadaaladda ee aanay noqon ujeedo ah in xukun qof lagu qaado oo keliya.

Go'aanka In Dacwad la Qaado iyo In Kale

Kiis kasta oo adeegga dacwad-ku qaadiddu ka helaan booliiska dib ayaa looga fiirsadaa si loo hubiyo inay sax tahay in la sii wado in dacwadda la qaado. Kiisaska waaweyn ama dhinacyada badan leh, dacwad-qaadayaasha ayaa go'aan ka gaadha in qof lagu xukumo fal dembi iyo in kale, iyo haddii ay sidaa tahay, waxa uu falka dembi noqon doono.

Marka la go'aaminayo in ay tahay in kiis dacwad la geeyo maxkamad iyo in kale dacwad-qaadayaashu waxay ka fekerayaan waxyaalaha kale ee dacwad-qaadidda lagaga maarmi karo ee xaaladdaha ku haboon. Tan waxaa ka mid ah digniin sahlan oo shuruudaysan oo la siiyo dadka waaweyn, dhalinyarada, canaan, digniin ama digniin shuruudaysan.

Marka aanu fayl ka helo booliiska, dacwad-qaadde ayaa waraaqaha akhriyi doona oo go'aan ka gaadhi doona inay jiraan cadaymo ku filan oo laga hayo eedayaneha iyo in kale iyo in dacwad-ku qaadid danaha dadweynaha loogu baahan yahay iyo in kale. Maadaama ay xaaladuhu isbedeli karaan, dacwad-qaaduhu wuxuu kiiska ku sameeyaa dib-ugu fiirsi joogto ah. Haddii uu dacwad-qaaduhu ka fekerayo inuu bedelo xukunka ama kiiska joojiyo, wuxuu la xidhiidhi/waxay la xidhiidhi doontaa booliiska mar kasta oo ay suurtagal tahay. Tani waxay booliiska fursad u siinaysaa inay bixiyaan warbixino dheeraad ah oo laga yaabo inay saamayn ku yeeshaan go'aanka.

Inkasta oo booliiska iyo adeegga dacwad-ku qaadiddu si buuxda u wada shaqeeyaan, haddana waxaanu nahay kuwo gebi ahaan kala madaxbanaan, masuuliyadda kama dambaysta ah ee go'aanka ah in kiis dacwad fal dembi oo la xukumay la sii wado iyo in kale waxaa iska leh adeegga dacwad-qaadidda.

Dacwad-qaadayaashu waa inay isweydiiyaan labada su'aalood ee soo socda marka ay gaadhayaan go'aamadooda

Ma jiraan cadaymo ku filan oo eedaysanaha lagu hayo?

Waa inay jiraan cadaymo ku filan oo eedaysanaha laga hayo, si loo helo 'saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid'. Saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid waa baadhitaan xaqiiqo ku salaysan. Taa macnaheedu waa in guddi garwadeeno ama guddi maxkamadeed ama xaakim keligii kiiska dhagaysanaya, oo si sax ah loo qoondeeyey, una dhaqmaya si waafaqsan sharciga, ay u badan tahay inay mudaaciga ku xukumi lahaayeen dacwadda lagu soo oogay. Tani waa baadhitaan ka duwan ka ay tahay inay maxkamaddaha dembiyadu isticmaalaan. Maxkamadda sare ama guddi garwadeeno waa inay eedaysane xukumaan haddii ay hubaan inay tahay/inuu yahay dimbiile oo keliya.

Marka ay go'aan ka gaadhayaan in ay jiraan cadaymo ku filan oo dacwad lagu qaado iyo in kale, dacwad-qaadayaashu waa inay ka fekeraan in cadayta maxkamaddu isticmaali karto iyo inay tahay mid lagu kalsoonaan karo iyo in kale. Tan macnaheedu waa inay qiimeeyaan tayada cadaymaha ay bixiyeen dhamaan markhaatiyaashu, ka hor inta aanay go'aan gaadhin. Marka laga fekerro in ay caawimo leedahay in qiimayn lagu sameeyo ku kalsoonaanshaha cadayn uu markhaati bixiyey ama in si ka fiican loo fahmo cadaymo dhinacyo badan leh/isku qasan, waa in dacwad-qaade si munaasin ah loo tababaran oo la ansixiyey uu markhaatiga la yeeshaa waraysi dacwadda ka hor ah. Go'aanka ah in kiis la baajiyo macnaheedu maaha in dacwad-qaaduhu uu go'aansaday inuu aamino hal markhaati uuna beensado markhaati kale.

Haddii aanay jirin saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid, waa in aan kiisku sii socon, iyadoo aan loo eegayn sida uu khatar ama xasaasi u yahay.

Haddii ay jirto saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid, dacwad-qaaduhu wuxuu u gidbi doonaa su'aasha ku xigta.

Miyaa dacwad-ku qaadid loogu baahan yahay si ah danaha dadweynaha?

Weligeed ma ahayn sharciga wadankan in falal dembi oo kasta si toos ah isla markiiba dacwad loogu qaado. Sababtan darteed, kiis walba, dacwad-qaaduhu waa in uu ka fekeraa in dacwad-ku qaadid loogu baahan yahay danaha dadweynaha.

Dacwad-qaadid ayaa badiyaa dhici doonta ilaa haddii mooyee uu dacwad-qaade hubo in ay jirto arrimo danaha dadweynaha ah oo ka hor imaanaya dacwad-qaadid, kuwaas oo ka ahmiyad badan kuwo taageeray in la dacwad la qaado, ama haddii mooyee dacwad-qaaduhu uu ku qanacsan yahay in laga yabo in aan danta dadweynaha si wanaagsan loogu adeegin, tusaalaha hore, in la siiyo dembiilaha fursad ah in arrinta wax lagaga qabto xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan

Arimaha danaha dadweynaha ah ee saamayn ku yaalan kara go'aanka ah in dacwad la qaado kiis waliba ka kale waa ka duwanaan karaa. Marka uu falka dembi ka sii weyn yahayba ama qoraalada keydsan ee hab-dhaqanka dembiyeed ee dembiilaha ka sii badan yihiinba, waxay uga dhowdahay in dacwad-qaadid loogu baahan doono si danaha dadweynahu ku jirto. Dhinaca kale, waxay uga dhowdahay in aan dacwad-ku qaadid loo baahan haddii, tusaale ahaan, ay u badan tahay in maxkamaddi ay qofka ku qaado ganaax/ciqaab sahlan ama khasaaraha ama waxyeelada la xidhiidha falka dembi ay ahayd mid yar, ayna ahayd mid ka dhalatay hal dhacdo.

Dhibanayaal falka dembi

Markii ga'aan laga gaadhayo in dacwad-ku qaadid loogu baahan yahay si danaha dadweynaha ah, dacwad-qaadayaashu waa inay xisaabta ku daraan wixii ra'yi ah ee uu Dhibanaha soo jeediyo ee la xidhiidha saamaynta uu falka dembi ku yeeshay. Kiisaska qaarkood, dacwad-qaadayaashu waa inay xisaabta ku daraan wixii ra'yi ah ee uu dhibanaha qoyskiisu soo jeediyo. Laakiin adeegga dacwad-ku qaadiddu uguma hawlgalaan dulmanayaasha ama qoysaskooda si la mid ah sida ay qareenadu ugu hawlgalaan dadka ay u doodayaan, dacwad-qaadayaashuna waa inay sameeyaan fekrad guud oo danaha dadweynaha ah.

Baadhitaanka Bar-cabiraad

Waxaa jira kiisas ay noqonayso mid aan munaasib ahayn in qof damiin ahaan loo sii daayo ka dib marka xukunku dhaco, laakiin marka in la helo cadaymaha 'saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid' iyo in kale aan weli la heli karin. Tusaale ahaan, cadaymaha caafimaad ama khibrado kale, laga yaabey in aan lagu heli karin mudada gaaban ka horaysey intaan xukunka la gaadhin. Marmarkaas iyaga ah, Dacwad-qaadayaashu waxay isticmaali doonaan Baadhitaanka Buuxa. Si baadhitaankan loo isticmaalo, waa inay jiraan sababo macquul ah oo lagu aaminsan yahay in cadaymo dheeraad ah la hlei doono, oo lagu heli doono muddo macquul ah gudaheed; in weynaanta/khatarnimada iyo cawaaqibka kiiska tahay mid keenaysa samaynta go'aan xukun oo isla markaaba ah; iyo inay jiraan sababo lagaga soo horjeesto damiin

Kala doorasho xukunnada

Marka ay kiis dib-uga fiirsanayaan, dacwad-qaadayaashu waa inay had iyo goor ka fekeraan in xukunada mudaaciga lagu qaadayaa ay yihiin kuwo sax ah. Waa inay hubiyaan in xukunadu muujinayaan weynaanta/khatarnimada iyo baaxadda dembiga ayna maxkamadda siiyaan awood xukun-ku qaadid oo ku filan. Waxaa iyana sidoo kale muhiim ah in nooca xukun iyo tirada xukunada ya kiiska u ogolaadaan in maxkamadda loogu sharaxo dariiq cad oo sahlan.

Tan macnaheedu waa in mudadiiba mar laga yaabo in dacwad-qaade uu bedelo xukunka lagu qaadayo mudaaciga, haddii uu jiro xukun kaga haboon xaaladdaha falka dembi.

Xal-gaadhid Maxkamadda Ka Baxsan

Dacwad-qaadayaashu waxay bixin doonaan digniin shuruudaysan marka ay tahay talaabo qaadid u qalanta inta uu leeg yahay dembiga la galay iyo cawaaqibkiisa. Digniin shuruudaysan maaha xukun dembi laakiin waxay qayb ka tahay qoraalada kaydsan ee dembiilaha ee dembiyada, waxaana laga yaabaa in la daalacdo xiliga dooda maxkamadda ee wixii hanaan-dacwadeed ee ka dambeeya. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in dacwad-qaadayaashu xisaabta ku daraan haddii dembiiluhu uu dembi kale sameeyo.

Dacwad-qaadayaasha oo keliya ayaa go'aamin kara in la ansixiyo bixinta digniin sahlan, oo la siiyo dembiile galay dembi lagu dhegaysan karo Maxkamadda Sare (Crown Court) oo keliya. Xiliyada ay tani noqon doonto xal munaasib ah waxay noqon doonaan kuwa reeban/inta badan ka soo hadha.

Dhamaan kiisaska kale, dacwad-qaadayaashu waxaa laga yaabaa inay amraan in la bixiyo digniin sahlan ama ay soo jeediyaan, tusaale ahaan, Ogaysiis Ganaax qas/Fawdo (Penalty Notice for Disorder).

Hase yeeshee, samaynta Ogaysiis Ganaax qas/Fawdo waa go'aan uu booliisku iska leeyahay.

Aqbalidda digniin sahlan ama xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan oo kale, taas oo lagu dhaqmo waxay gelaysaa booskii dacwad-qaadid. Haddii digniinta sahlan ee la bixiyey la diido dacwad-qaadid waa inay daba socotaa, taas oo ah dembigii asalka ahaa. Haddii wax xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan ah la aqbali waayo, dacwad-qaadayaashu waxay dib uga fiirsan doonaan danaha dadweynaha, waxayna go'aamin doonaan in ay dembiilaha dacwad ku qaadaan iyo in kale. Badanaa, dacwad ku qaadid waa inay waa in lagu sameeyaa falkii dembi ee hore.

Dhalinyarada

Marka laga cabirayo sharciga dembiga, qofka dhalinyarada ahi waa qofka 18 sano ka yar.

Dacwad-qaadayaashu waa inay ahmiyad u hayaan ujeedada ugu weyn ee hanaanka cadaaladda ee dhalinyarada, taas oo ah in laga hortago in caruuraha iyo dhalinyaradu sameeyaan falal dembi. Dacwad-qaadayaashu waa inay ka fekeraan danaha dhalinyarada marka ay go'aaminayaan in ay tahay danaha dadweynaha in dacwad la qaado iyo in kale. Hase yeeshee, Dacwad-qaadayaashu maaha in aanay dacwad qaadin iyadoo sababta keliya ee ay sidaa u samaynayaan tahay cimriga eedaysanaha. Sida uu u weyn yahay/khatar u yahay falka dembi ama hab-dhaqankii hore ee qofka dhalinyarada ah ayaa aad muhiim u ah.

Kiisaska ku lug leh dhalinyarada waxaa keliya oo badanaa loo gudbiyaa adeegga dacwad-qaadidda si dacwad-qaadid loogu sameeyo, haddii qofka dhalinyarada ah hadda ka hor canaan loo soo jeediyey lana siiyey digniin kama dambays ah, ilaa mooyee falka dembi yahay mid khatar ah/weyn oo aan labadaa midna ku haboonayn ama ilmaha ama qofka dhalinyarada ahi aanu qirsanayn inuu sameeyey falka dembi.

Canaan u soo jeedinta, digniinta kama dambaysta ah iyo digniinaha shuruudaysan waxaa loogu talo galay inay hor istaagaan in dembi dib loogu noqdo iyo xaqiiqada ah in fal dembi oo ka dambeeyey dhacayna waxaa laga yaabaa inay muujiso in xalalka hore loo sameeyay aanay ahayn kuwo waxtar yeeshay. Danaha dadweynahu waxay inta badan u baahan doonaan in dacwad-qaadid lagu sameeyo kiiska noocan ah.

Aqbalidda Qirasho Dembiilenimo

Marmarka qaarkood waxaa laga yaabaa inuu mudaaci doonayo inuu dembiilenimo u qirto qaar dembiyada ka mid ah laakiin aanu dhamaan qiran ama inuu doonayo inuu dembiilenimo u qirto dembi kale oo ka duwan, oo laga yaabo inuu ka yar yahay. Dacwad-qaadayaashu waa inay keliya aqbalaan qirashada mudaaciga haddii ay aaminsan yihiin in maxkamaddu awooddu awoodo inay samayso xukun u qalma weynaanta falka dembi. Waxa aan dacwad-qaadayaashu samayn karin waa in ay xaakimka ama guddiga garwadeenada ka dalbaan inay xukun gaar ah qaadaan.

Marka la go'aamiyo in qirashada la bixiyey tahay mid la aqbali karo iyo in kale, dacwad-qaadayaashu waa inay hubiyaan in danaha Dhibanaha , ama markii ay munaasib tahay ra'yiga qoyska dulmanaha, xisaabta lagu daro marka la go'aaminayo in aqbalidda qirashadu tahay mid danta dadweynuhu ku jirto iyo in kale. Hase yeeshee, go'aanku wuxuu u yaalaa dacwad-qaadaha.

Dib-uga Fiirsiga Go'aanka Dacwad-qaadidda

Caadiyan, haddii adeegga dacwad-qaadidda uu eedaysane ama mudaaci u sheego in aanay jiri doonin dacwad-qaadid , ama in dacwad-qaadiddii la joojiyey, kiisku mar kale ma bilaaban doono. Laakiin marmarka qaarkood waxaa jira sababo gaar ah oo adeegga dacwad-qaadiddu ay ku bedeli doonto go'aan ah in aan dacwad la qaadin. Sababahaas waxaa laga yaabaa inay ku jiraan marka ka fiirsi cusub oo lagu sameeyay go'aankii hore uu muujiyo inuu ahaa mid khalad ah, loona baahan yahay in dacwad la qaado, si loo ilaaliyo kalsoonida lagu qabo hanaanka cadaaladda dembiyada; ama mudadaa ka dib la helay cadaymo intii hore ka badan.

Khadka Gargaarka Dhibanaha

Haddii aad u baahan tahay caawimo ama gargaar dheeraad ah, waxaad Khadka Gargaarka Dhibanaha ka wici kartaa telefoonka:

0845 30 30 900

Kan waxaa wada Victim Support (Gargaarka Dhibanaha), urur samafal oo madaxbanaan, kaas oo shaqaalahiisa tababaran iyo dadka bilaashka ugu shaqeeya ay bixiyaan gargaar niyadeed, warbixino iyo caawimooyin hawlgal oo ay siiyaan dadka dembiyadu saameeyeen.

Khadka Gargaarka Dhibanaha waa lambar wadanka gudahiisa ah, waxayna bar wadaxidhiidh oo daruuri ah u tahay qof kasta oo ay dhibaato ka soo gaadhey saamayn fal dembi, iyadoo aan loo eegayn in fal dembi la gudbiyey iyo in kale.

Shaqaalahu waxay sharixi karaan adeegyada bilaashka iyo qarsoodiga ah ee la heli karo iyadoo loo sii marayo Gargaarka Dhibanaha , waxayna kula xidhiidhinayaan Qorshayaasha Gargaarka Dhibanaha ee agagaarkooda ama Adeegga Markhaatiga ama ururada kale haddii loo baahdo.

Cabashooyinka

Waxaanu u heelanahay in aanu cabashooyinka ugu hawlgalo si dareen leh, cadaalad ah oo kalsooni leh. Faahfaahin ah hanaankayaga cabashooyinka ayaa laga heli karaa bogga internet-ka ee CPS: www.cps.gov.uk

Meelo lala xidhiidho oo waxtar leh

Hanaanka cadaaladda dembiyadu wuxuu ka kooban yahay tiro ururo ah. Ururada soo socda waxaa laga yaabaa inay waxtar kuu yeeshaan haddii aad u baahan tahay wax warbixin dheeraad ah.

The Home Office (Wasaaradda Arrimaha Gudaha)

www.homeoffice.gov.uk

Telefoon: 020 7035 4848

Iimayl: public.enquiries@homeoffice.gsi.gov.uk

The Ministry of Justice (Wasaaradda Cadaaladda)

www.justice.gov.uk

Telefoon: 020 3334 3555

Iimayl: general.queries@justice.gsi.gov.uk

Court Service (Adeegga Maxkamadda)

www.hmcourts-service.gov.uk

Telefoon: 0845 4568770

Criminal Justice Service (Adeegga Cadaaladda Dembiyada)

www.cjsonline.gov.uk

OCJRenquiry@cjs.gsi.gov.uk

The Association of Chief Police Officers (Ururka Maddaxa Saraakiisha Booliiska)

www.acpo.police.uk

Telefoon: 020 7084 8950

Iimayl: info@acpo.pnn.police.uk

Victim Support (Gargaarka Dhibanaha)

www.victimsupport.org.uk

Telefoon: 0845 30 30 900

National Association for the Care and Resettlement of Offenders (Ururka Qaranka ee Daryeelka iyo Dib-u-dejinta dembiilayaasha)

www.nacro.org.uk

Telefoon: 020 7840 7200

Youth Justice Board (Guddiga Cadaaladda Dhalinyarada)

www.yjb.gov.uk

Telefoon: 020 3372 8000

Iimayl: enquiries@yjb.gov.uk

Xog-weydiinta CPS

Wixii faahfaahin guud oo la xidhiidha CPS iyo talooyinka ah cida lala xidhiidhayo, fadlan la xidhiidh CPS Enquiries (Xog-weydiinta CPS)

Iimayl: enquiries@cps.gsi.gov.uk

Unuggu ma bixin karo talobixin sharciyeed, laakiin waxaa laga yaabaa inuu awoodo inuu bixiyo warbixno hawlgal. Waxaad rayi-celin rasmi ah ama faahfaahin ah wixii cabashooyin ah ku bixin kartaa inaad sii mariso boggayaga internet-ka.

Kani waa dukumeenti dadweyne.

Nuqulo dheeraad ah oo dukumeentigaan ah iyo warbixino ku saabsan luuqadaha iyo qaababka kale ayaa laga heli karaa:

CPS Communication Division
Rose Court
Southwark Bridge
London SE1 9HS

Iimayl: publicity.branch@cps.gsi.gov.uk

Wixii macluumaad ku saabsan Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamadeed, iyo daalacashada ama internet kala soo baxid nuqul elektroonik ah oo dukumeentigaan ah, fadlan booqo boggayaga internet-ka:

www.cps.gov.uk
CPS Policy Directorate
© Crown Copyright 2010